

Qaybinta boosaska Iskuulka ee ardayda hadda dhigata Iskuulka Møllergata

Ardayda hadda dhigata Iskuulka Møllergata waxaa loo qaybin doonaa Iskuulada Ila, Lakkegata ama iskuulka Vahl. Ardaydu waxay bilaabi doonaan iskuulka cusub bisha Agoosto 2026.

Ardayda dhigata fasallada soo-dhawaynta (mottaksklasser) ee iskuulka Møllergata waxay heli doonaan macluumaad gaar ah oo ku saabsan waxbarashadooda mustaqbal

Ardayda fasallada 1aad-4aad

Ardayda fasallada 1aad ilaa 4aad waxaa loo qaybin doonaa iskuulada Ila, Lakkegata iyo Vahl.


Ardayda ku nool aagga hore ee qaabilaadda iskuulka Møllergata

- Ardayda ku nool aagga midabka jaallaha ah waxaa loo soo bandhigi doonaa boos iskuulka Vahl.
- Ardayda ku nool aagga midabka buluugga ah waxaa loo soo bandhigi doonaa boos iskuulka Ila.
- Ardayda ku nool aagga midabka guduudan (lilla) waxaa loo soo bandhigi doonaa boos iskuulka Lakkegata.

Ardayda ku nool meel ka baxsan aagga hore ee qaabilaadda iskuulka Møllergata

Ardayda ku nool aagga qaabilaadda iskuulka Ila waxaa la siin doonaa boos iskuulka Ila. Ardayda ku nool aagga qaabilaadda iskuulka Lakkegata waxaa la siin doonaa boos iskuulka Lakkegata. Ardayda ku nool aagga qaabilaadda iskuulka Vahl waxaa la siin doonaa boos iskuulka Vahl.

Ardayda kale ee iskuulka Møllergata waxaa loo qaybin doonaa Ila, Lakkegata ama Vahl iyadoo lagu salaynayo haddii ay ku nool yihiin galbeed, bari ama koonfurta Oslo, sida ku cad khariidadda hoose.



Ardayda fasallada 5aad iyo 6aad

Ardayda fasallada 5aad iyo 6aad waxaa loo soo bandhigi doonaa boos iskuulka Lakkegata.

Fursadda lagu dooran karo iskuul kale

Dhammaan ardayda waxay heli doonaan boos mid ka mid ah iskuulada Ila, Lakkegata ama Vahl, iyadoo lagu salaynayo doorashada waalidiinta. Haddii aad rabto in ilmahaagu bilaabo iskuul ka duwan kan loo qoondeeyey, waa inaad soo codsataa.

Codsiga waxaa lagu diraa e-dialog. Cinwaanka (tittel) ku qor: "Skoleplass". Qoraalka fariinta ku dar magaca ilmaha, taariikhda dhalashada iyo iskuulka aad rabto. Waxaad sidoo kale codsiga ku diri kartaa iimayl adigoo la xiriiyaya iskuulka ilmaha loo qoondeeyey.

Waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga waa 3 toddobaad laga bilaabo marka aad heshaan warqadda ku saabsan qoondaynta booska iskuulka.

Haddii arrintani kugu adkaato, waxaad si toos ah ula xiriiri kartaa iskuulka Møllergata Telefoon: 23 46 66 00 ama limayl: postmottak.mollergata@osloskolen.no Iskuulka Møllergata wuxuu ku wargelin doonaa iskuulka ilmaha loo qoondeeyey wuxuuna kaa caawin doonaa inaad codsato iskuulka aad rabto.

Haddii waalidiintu aanay sheegin iskuul gaar ah, ilmaha waxaa loo qoondayn doonaa iskuulka sida kor ku xusan.

Haddii aad rabto iskuul ka duwan Ila, Lakkegata ama Vahl, waa inaad dirtaan codsii beddelka iskuulka (skolebytte).

Warqad macluumaad ah oo loo diro waalid kasta

Dhammaan waalidiinta waxay heli doonaan warqad gaar ah oo ay ku qoran tahay iskuulka ilmahooda loo qoondeeyey iyo faahfaahin ku saabsan sida ay u codsan karaan iskuulka ay doorbidayaan.